

Adeegyada Gudbinta ee Qoysaska ay U joogaan Carruurta Yaryar



ama wac
207-287-3991

Barnaamijka Nafaqada ee WIC

WIC waxay u adeegtaa haweenayda uurka leh, haweenka naas-nuujiya, iyo carruurta jira ilaa da'da 5 sano, ayna ku jiraan carruurta dawlada gacanta ku hayso. WIC waa daryeel nafaqo oo dhamaystiran wuxuuna baxshaa cuntooyin Caafimaad leh, waxbarashad nafaqada, taageerada naas-nuujinta iyo u gudbinta adeegyada kale.



ama wac
800-698-3624

Carruurta Qaba Baahiyaha Gaarka ah ee Daryeelka Caafimaadka (CSHN)

Laanta Carruurta Qaba Baahiyaha Gaarka ah ee Daryeelka caafimaadka (CSHN) waxay la shaqaysaa qoysaska carruurta qaba baahiyaha gaarka ah ee daryeelka caafimaadka ee ka yar da'da 22 sano. CSHN ayaa ku hagi karta qoysaska iyo ururada helitaanka khayraadka ugu haboon ee bahiyaha ilmahooda. Shaqaalaha ayaa ku hagi kara qoysaska nidaamyada balaaran ee caafimaadka, ayagoo ku xiraaya daryeelka gaarsiinaaya natiijada ugu wanaagsan ee bukaanka.



Qorshaha Daryeelka Badqabka (POSC)

Qorshaha Daryeelka Badqabka ee Maine ayaa lagu abuuray iskaashi u dhexeeya adeeg bixiyaha daryeelka caafimaadka ama adeegyada bulshada, hooyada iyo/ama daryeele kale, ayadoo lagu aqoonsanaayo awoodaha iyo baahiyaha qoyska, ilaha iyo talaabooyinka faa'iidada leh si qaabka ugu haboon looga taageero dhallaanka iyo qoysaska la kulmay maandooriyaasha. Qorshaha Daryeelka Badqabka waxaa badanaa ku jira adeegyada gudbinta ama siinta xogta xariirka qoysaska si ay ayagu u raadraacaan.



ama wac
1-855-797-4357

Caymiska Caafimaadka ee Maine

Caymiska Caafimaadka ee Maine (CoverME.gov) ayaa bixinaysa xog ku saabsan dookhyada caymiska caafimaadka ee bilaashka ah ama kharashka yar ee qoysaska Maine. Waxaad sidoo kale helaysaa macluumaadka ururada maxaliga ah ee kaa caawin kara fahanka dookhyadaada caymiska iyo buuxinta codsiga.



ama wac
877-770-8883

Adeegyada Kobaca Carruurta/ Wax-ka- qabadka Hore

Adeegyada Kobaca Carruurta/ Nidaamka Wax-ka-qabadka Hore waa Qaybaha Waxbarashada Heerka dhexe ee bixisa Wax-ka-qabashada Hore (dhalashada ilaa labo sano jir) iyo Waxbarashada Dawlada oo Bilaash ah ee Ku haboon Ardayda (ee da'aha sadex ilaa shan sano) ayadoo ay kormeerayso Waaxda Waxbarashada ee Maine.



ama wac
1-888-644-1130

Nidamaka Gudbinta ee Cradle ME

CradleME waxay kaa caawinaysaa inay kugu xirto adeegyada saxda ah ee guriga ku salaysan ee adigga iyo cunugaaga. CradleME waa iskaashi u dhexeeya labo barnaamij: Kalkaalinta Caafimaadka Dadwaynaha iyo Qoysaska Maine.



Qoysaksa Maine

Qoysaksa Maine waa shabakad gobalka dhan ah oo ka kooban kooxaha bulshada oo u adeegga baahiyaha haweenayda uurka leh iyo waalidiinta ilmaha dhalay dhawaan. Booqdayaasha daryeelida iyo xirfada ee guriga ayaa kaala shaqayn doona helitaanka xogta iyo ilaha kaa taageeraaya caafimaadka jirka iyo dareenka ee ilmahaaga iyo qoyska dhan.



ama wac
1-888-644-1130

Kalkaalinta Caafimaadka Dadwaynaha (PHN)

Kalkaalisooyinka Caafimaadka Dadwaynaha ee Maine CDC ayaa baxsha adeegyada Caafimaadka guriga lagu baxsho ee qoysaska. Dhammaan haweenka uurka leh iyo kuwa umusha ah iyo dhammaan ilmaha dhasha iyo dhallaanka ilaa 12 bilood ee da'da ayaa heli kara booqashada Kalkaalisada Caafimaadka Dadwaynaha. Haddii aad su'aalo ka qabto caafimaadkaaga ama caafimaadka ilmahagaa, waxaad codsan kartaa kalkaaliso markaad doonto adoo wacaaya lambarka CradleME.

Si aad iskaanka u mariso koodhahka QR, fur barnaamijka kaamirada ee aaladaada. Ku aadi koodhka QR ee aad doonayso inaad iskaanka mariso. Raadi qaybta ogaysiiska ee korka shaashada - guji si aad u gasho webseedka.

Hay'adan waa bixiyaha fursadda loo siman yahay.

